

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>



Noofambar 23, 2020

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka:
Waad mahadsan tahay

Fasaxa Maalinta Thanksgiving-ku waa waqti dhaqameed waad mahadsan tahay “thank you” lagu yiraahdo dadka ka tirsan nolosheena oo la isku yimaado asxaabta iyo dadka la isku dhow yahay. Kor u kaca weyn ee COVID-19 ee gobolkeena, iyo baahida loo qabo in la qaado taxaddaro dheeraad ah, wuxuu ka dhigan yahay in Thanksgiving-kani uu noqon doonaa mid ka duwan kuwii hore.

Marka lagu daro cudurka baahsan, nolosha waxaa dhanka kale u rogay dabka kaymaha. Waxaan sidoo kale, si xaq ah, fiiro gaar ah u siinay halganka lagula jiro joojinta cunsuriyada. Iyada oo bartanka lagaga jiro hawshan adag, waxay noqon kartaa mid adag in la joojiyo oo wax laga fikiro. Waxaan rabaa in aan xaqiijiyo in aad ogtihiin sida aan mahadnaqa ugu hayo idinka, ururadiina iyo shaqada aad qabataan maalin kasta.

Sanadkani la soo dhaafay wuxuu inoo keenay in aan dhammaanteen hoos u fiirino shucuurteena iyo dareenkeena jireed si aanu u sii wadno qabashada shaqada muhiimka ah ee aan qabano si aan u taageerno dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka. Waxaan sii wadaa in uu i cajab geliyo heerka ka qayb qaadasho iyo daryeel ee aad soo bandhigtaan maalin kasta.

Idinka oo qorsheysanaya Thanksgiving-kan aan caadiga ahayn, waxaan idinka codsanayaa in aad raacdaan talooyinkan loogu talagalay ammaanka fasaxa iyo badbaadada cuntada fasaxa:

[https://www.oregon.gov/oha/ERD/Pages/Safe-Holiday-Celebrations-COVID-19.aspx?wp4287=f:{c:38103,o:{t:2,o:\[%22Af+Soomaali+%2F+Somali%22\]}}](https://www.oregon.gov/oha/ERD/Pages/Safe-Holiday-Celebrations-COVID-19.aspx?wp4287=f:{c:38103,o:{t:2,o:[%22Af+Soomaali+%2F+Somali%22]}})

Waxaan idiin rajeynayaa in aad yeelataan Fasaxa Maalinta Thanksgiving-ka oo xiiso leh.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.